**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

District Court Of Hargeisa

المحكمة المحلية

# Maxkamadda Degmadda Hargeysa

## XAFIISKA GUDOOMIYAHA

MDH/ 108 /2023

Taar:-12/02/2023.

Ku:- Cidda ay Khusayso.

Uj:- Caddayn Fayl Lumay oo Leh TR-NO 3349 iyo Lahaansho Dhul leh TR-No 31548 kuna yaala Degmada Ib-Koodbuur Xaafada Guul-Allaah Cabirkiisuna yahay 18*24M

MAXKAMADDA DEGMADA HARGEYSA: -

Markay Aragtay:- Arjiga ku Taariikhaysan **12/02/2023** ee uu Maxkamada u soo qoratay **Cabdishakuur Maxamed Ismaaciil** kuna codsanayo in loo sameeyo cadaynta faylka Lumay iyo **in laga tirtiro lahaanshaha dhulka** uu iska leeyahay **CabdiQaadir Axmed Maxamuud** kaas oo uu ku qornaa Codsaduhu dhulkaas oo ku yaala Degmada **Ib-Koodbuur** Xaafada **Guul-Allaah**, Cabirkiisuna uu yahay **18*24M**, Lehna jihooyinka kala ah:-

**Bari**............... Waddo    **Waqooyi**....... Waddo

**Koonfur**......... Dhisme    **Galbeed**........ Dhisme

Markay Aragtay:- Warqada Nootaayada ah ee sumadeedu tahay **ALPN/CLG/225/4/2023** kuna taariikhaysan **11/02/2023** ujeedadeeduna tahay **Caddayn Lumid Fayl iyo Caddayn Lahaansho Dhul**, taas oo uu **Cabdishakuur Maxamed Ismaaciil** ku caddeeyay in dhulka Cabirkiisa, jihooyinkiisa iyo Faahfaahintiisuba sare ku xusan yihiin ay iibkiisa hore ugu kala noqdeen cidii ka iibisay oo ahayd **Nuur Colhaye Hode** isla markaana uu Wakhti xaadirkan leeyahay **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud.**

Markay Aragtay:- Labada Markhaati ee kala ah:-

1. Saxardiid Jirde Maxamed
2. Axmed Barre Ismaaciil

Markay Aragtay:- Qod Sharci ee kala ah 938, 939, 941, 945, 956, 947, 948 X.M iyo Dhamaanba Kutubta Shareecada islaamka.

Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobadda sharci Ee Sare ku Xusan Dartood waxay Maxkamadu Cadaynaysaa in Dhulka Cabirkiisa iyo Jihooyinkiisuba sare ku xusan yihiin ee uu ku qornaa **Cabdishakuur Maxamed Ismaaciil** aanu lahayn balse uu Sifo qaldan looga iibiyey iibkiina lagu kala noqday isla markaasna uu leeyahay **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud.**

**Sidaasi darteed,** maxkamadu waxay cadaynaysaa in dhulka Cabirkiisa, jihooyinkiisa iyo Faahfaahintiisuba sare ku yihiin uu iska leeyahay **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud** lagana tirtiro Lahaanshaha uu hore ugu qornaa Cabdishakuur Maxamed Ismaaciil.

***Yaxye Xuseen Yuusuf***

***Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Hargeysa***

Kaaliye:- CabdiQani Jaamac Xuseen

REPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF JUSTICE
ALMIS PUBLIC NOTARY
HARGEISA

جمهورية صوماليلاند
وزارة العدل
مكتب كاتب العدل ألمس
هرجيسا

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA CADDAALADDA

XAFIISKA NOOTAAYADA ALMIS PUBLIC NOTARY & ADVOCATE

Tel: +252-2-512458, +252-63-4428717, +252-63-4429604, +252-65-9117040, Email: almisnotary@hotmail.com

REF/ALPN/CLG/ 225 /4/23. Date: February 11, 2023.

CIDAY KHUSEYSO

# UJEEDDO:- CADDEYN LUMID FAYL & CADDEYN LAHAANSHO DHUL

Anigoo ah **Cabdishakuur Maxamed Ismaaciil Tel:063-4240187** Waxaan halkan ku caddeynayaa inuu iga lumay falka aan ku qoranahay ee ku yaala Degmada Ibraahim Koodbuur Xaafada Guul Allah ee leh TRNo:3349 cabirkiisuna yahay 18x24m soohdintiisuna tahay Bari/Waqooyi: Waddo, Koonfur/Galbeed: Dhisme dhulkaasi oo aanu ku kala noqonay dadkii iga iibiyey oo lacagtii ii celiyey kadib markii aan ogaaday in dhulkaasi uu iska leeyahay Cabdiqaadir Axmed Maxamuud lehna TRNo:31548.

Sidaa darteed waxaan cid kastoo ay khuseyso ka codsanayaa in Faylkaasi ku qoran magacayga la buriyo (Cancel-gareeyo) oo system-ka laga saaro maadama iibkiisii aan buriyey

Waxaan caddeyntan saxeexay anigoo miyir iyo maanba qaba kuna hor saxeexay Xafiiska Nootayada **ALMIS PUBLIC NOTARY.**

**MAGACA & SAXEEXA CADDEYAHA**

**CABDISHAKUUR MAXAMED ISMAACIIL**

**MARKHAATIYAAL**

1) **SAXARDIID JIRDE MAXAMED**
   **TEL:063-4446161**

2) **AXMED BARRE ISMAACIIL**
   **TEL:063-4243546**

**CADDEYN NOTAAYO**

Xafiiska Nootaayadda Almis Public Notary wuxuu caddeynayaa in caddeyntan hortiisa lagu saxeexay maanta oo ay bishu tahay February 11, 2023, Saxeexyada ku yaala yihiin kuwii Caddeyaha & Markhaatiyaasha. Sidaa darteedna waa caddeyn sugan.

**(G/QAAN. QAASIM ISMAACIIL DUCAALE)**
**SARK. NOTAAYADA SHARCIGA ALMIS P. NOTARY**

ALMIS PUBLIC NOTARY NO.4 Tel.. 428717 SOMALILAND HARGEISA & ADVOCATE

XAFIISKA XOGAHAYAHA

Go'aan Lr: 290 /2023

Date: 02th April 2023

Go'aan Guddi Fulneed:

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 02th April 2023 shir gudoomiyena ka ahaa Duqa Caasimadda (C/kariin Axmed Mooge), kuna saabsanayd Jawaab Celin, dood iyo falan qayn dheer ka dib.

Wuxuu Go'aansaday:-

Markuu Arkay:- Sharciga wasaaradda arimaha gudaha Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay:- Tixraaca warqada ku suntan MDH/108/2023 ee 12th February 2023 ujeedadeeduna tahay Caddayn fayl lumay oo leh Tr 3349 & Tr 31548 kuna yaala Degmadda I/Koodbuur Xaafada Guul allah cabirkun yahay 18x24m,kana soo baxday Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda hargaysa.

Markuu Arkay:- Tixraaca warqada XDHM/WD/189/2023 ee 06th March 2023 ujeedadeeduna tahay War-bixin dhul,kana soo baxday Agaasimaha Guud ee Waaxda Dhulka D.H.H (Eng Mursal Sh.Axmed C/laahi).

Markuu Ogaaday:- In dhulka war-bixintiisu kor ku xusan tahay uu yahay danguud sifihii lagu siiyeyna uu sharciga waafqasan yahay kuna lifaaqan yahay faylka.

Markuu Xaqiiqsaday:- Inay lagama maarmaan tahay in la cancel-gareeyo faylka uu ku qoran yahay C/shakuur Maxamed Ismaciil TR 3349,kaasoo si sharci daro ah uga baxay goobtaasi.

Markuu Tixgaliyay:- Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso

Gudiga Fulintu:-

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan guddida fulintu wuxuu go'aansaday in garsoore C/qaadir Axmed Maxamuud uu sifo sharci ah u leeyahay goobtaasi, taasoo uu soo cadeeyey Agaasimaha Guud ee dhulka D/Hoose, markii la arkay faylka dhamayska-tiran ee sida sharciga waafaqsan uga baxay D/hoose, kuna qoran yahay garsoorahaasi.

(Siciid Nuur Aw Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/hoose Harg Ahna
Xoghayaha Golaha Degaanka Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar (Khadar Nour)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada Ahna
Gud/Xigeenka Golaha Deegaan Harg

(MD C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargaysa ahna
Gudoomiyah Golaha Deegaanka Harg